CHILDREN'S AID SOCIETY *of* TORONTO

LA SOCIÉTÉ DE L'AIDE *à* L'ENFANCE DE TORONTO

Waalidnimada Gudaha Canada

Buuggan-yar waxaa loo qoray oo loogu talagalay waalidiinta yimid Canada ee dal kale ka yimid oo raba macluumaad ku saabsan sharciyada Canada ee barbaarinta ilmaha. Waxaa loogu tala galay inuu ka jawaabo su'aalaha waalidiinta aan weli aqoon u lahayn nidaamka waalidnimada ee Canada iyo inuu u tilmaamo waalidiinta meelaha ay Kaalmada ka heli karaan ee bulshada.

Waalid kasta wuxuu doonayaa inuu koriyo carruur farxad iyo caafimaad qabta. Maadaama ay carruurta ku xiran yihiin dadka waaweyn dhanka jacaylka iyo daryeelka, waxaa la siiyey aqoonsi gaara dhinaca sharciga. Canada waxay ka mid tahay saxiixayaasha Heshiiska Qaramada Midoobay ee ku saabsan Xuquuqda Carruurta, kaas oo ah xeerar kala duwan ee lagu ilaalinayo xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyadaha carruurta.

Canada ayaa sidoo kale waxay leedahay sharciyo u gaar ah ee badbaadinta carruurta oo siinaysa xuquuq gaar ah. Qaar ka mid ah sharciyadaas waxa leh Dawladda Dhexe, kuwaas oo saameynaya carruurta Gobol iyo Deegaan kasta. Qaar kale, sida sharciyada ilaalinta carruurta, waa kala duwan yihiin taas oo ku xiran Gobolka ama Deegaanka aad ku nooshahay. Si kastaba ha ahaatee; ilaalinta aasaasiga waa isku mid guud ahaan dalka oo dhan. Qoraalkan waxa uu bixinayaa macluumaad guud oo ka jawaabaya su'aalaha ay weydiiyaan waalidiin badan. Haddii aad dooneysid macluumaad khaas ah, la xiriir xarunta bulshadaada ama gobolka /deegaanka waaxda bulshada, qoyska ama adeegyada bulshada.

MAXAY TAHAY WAXYEELAYNTA ILMAHA?

Marka ilmaha si ula kac ah dhibaato loo gaarsiiyo ama marka waalidku ama daryeelaha ilmuhu ku guuldareystaan inay ilaaliyaan carruurta ku jira daryeelkooda, taas ayaa la yirahdaa Waxyeeleyn ilmaha. Waxyeeleynta carruurta waxa kasoo horjeedka sharciga Canada.

Gobol iyo Deegaan kasta ee Canada waxaa ka jira sharciga ilaalinta ilmaha si loo xaqiijiyo inaan carruurta dhibaato la gaarsiin. Waxaa jira noocyada kala duwan ee Waxyeeleynta ilmaha.

- Waxyeeleyn Jir-dil (inta badan ay geystaan waalidka ama daryeelaha ilmaha) taas oo ilmaha u geysta dhaawac.
- Waxyeeleyn dhinaca u galmoodka taas oo ah marka ilmaha loo isticmaalo dhinaca galmada ee qof weyn ama ilmo ka weyn si ay ugu istareexaan.
- Dayacid oo ah ku guuldaraysi in laga haqabtiro ilmaha baahidooda aasaasiga ah ee cuntada, huga, hoyga, daryeel caafimaad, waxbarasho, iyo ka ilaalinta dhibaato.

Waxyeeleynta ilmaha intooda badan waxay ka dhacaan guriga oo ay kasoo gaarto qof ilmuhu yaqaan ama ku kalsoon yahay.

MAXAY TAHAY EDBINTA MACQUULKA AH EE CANADA?

Habdhaqanka xagga edbinta iyo ciqaabta ee Canada waa isbedelaya. Berigii hore, carruurta waxaa loo arkayey inta badan sida hanti la leeyahay oo kale waalidiintuna waxay carruurtooda ula dhaqmayeen sidii arrin iyaga u gaar ah. Maanta, xuquuqda aasaasiga ah ee carruurta waxa loogu ballanqaadayaa sharciga bulshadeenuna waxay si firfircoon uga qayb qaadaneysaa kor u qaadida daryeelka carruurta oo dhan, iyo sidoo kale qaadiidda tallaabooyin si loo hubiyo badbaadadooda.

Bulshada Canada ayaa sidoo kale waxay aqoonsan tahay in waalidiinta oo dhan ay leeyihiin qiimo iyo Waxyaabo ay aaminsan yihiin oo u gaar ah. Waalidku waxa ay leeyihiin go'aanno badan ee ay xor u yihiin inay dejiyaan shuruuc and nidaamyo waalidnimada. Hase ahaatee; qaar ka mid ah dhaqamadaas waxaa loo qaadan karaa inay yihiin ku xadgudub mas'uuliyadda la saaray waalidiinta waxay kasoo horjeedka sharciga Canada.

Tiro sii kordhaysa ee dadka Canada waxay aaminsan yihiin in jir-dilku yahay hab aan habbooneyn ee edbinta carruurta. Dharbaaxo iyo haraati ka sokow, waxa arrintaas ka mid ah sidoo kale in la xirxiro ama meel lagu xiro. Jir-dilka ilma yar-yar gebi ahaanba waa arrin aan la aqbali karin. Waalidiinta intooda badan waa ay ka warqabaan in carruurta si qalafsan loo qabto- ama ahaato si xanaaq ah ama lala ciyaarayo-aad ayey ilmaha khatar ugu tahay. Ruxida waxay sababi kartaa dhaawac halis ah ama dhimashada.

Waqtigan hadda ah, sharcigu waa u oggol yahay waalidiinta inay u isticmaalaan edbinta carruurta "xoog macquul ah". Waxaa macquul ah waxay ku xiran tahay xaaladda markaas, laakiin garsoorayaasha ayaa tilmaamay in noocyo ka mid ah edbinta jir-dilka ee markii hore la oggolaa inaan maanta la oggolayn. Waxaa cad, dhaawac kasta oo u baahda daryeel caafimaad inuusan ahayn edbin macquul ah. Edbinta jir-dilka oo keena jug jirka, nabarro, harag dilaac waxaa loo qaadanayaa waxyeeleyn. Waalidiinta adeegsada suumanka, fiilooyinka korontada, ama Waxyaabo kale ee u iscticmaala edbinta waxay dhibaato weyn u geysan karaan ilmaha. Waxaa xaqiiqo ah in ciqaabta jirka ay horseedi karto jir-dil

dheeraad….

Waalidnimada Gudaha Canada

xad-gudub ah marka waalidiintu isxukunkooda lumiyaan ay markaas si xanaaq ah ilmahooda wax ugu dhuftaan. Waxaan ognahay inay jiraan siyaabo badan oo wax ku ool ah ee haggaagsan ee caawinaya carruurtu inay edeb yeeshaan. Haddii aad tahay qof si joogto ah u xanaaq badan ama edeb la'aanta ilmahaaga darteed isku buuqsan, barashada siyaabo kala duwan ee wax ka qabashada xaaladda jirta ayaa kaa caawin kara adiga iyo ilmahaagaba. Ka hubso Xarunta bulshadaada, waaxda caafimaadka dadweynaha, ama hay'adda soo saartay buuggan-yar wixii macluumaad ah sidii aad edeb la'aantaas ilamaha xal ugu heli lahayd.

MAXAY TAHAY WAXYEELAYNTA U GALMOODKA ILMAHA?

Waxyeeleynta u galmoodka waa marka ilmaha loo isticmaalo galmada ah istareexa qof weyn ama ilmo ka weyn.

Waa wax sharciga kasoo horjeeda in qof wayni:

- u taabtaan ilmaha hab galmo,
- ku dhiiri geliyaan ama ku khasbaan ilmaha inuu taabto qof kale hab galmo ah.
- ku dhiiri geliyo ama ku khasbo ilmaha in ay ka qayb qaataan hawlo la xiriira galmada, ama
- ilmaha ku yiraahdo istaabtaabo taas oo u daneyneysa qof weyn ulajeedadiisa galmo.

Qaar ka mid ah tusaalooyinka Waxyeeleynta galmo ee qof weyn sameeyo waxaa ka mid ah:

- isku xoqid xubnaha taranka ee ilmaha oo ujeedooyin galmo leh, iyo
- fiirsashada ilmaha dharka iska dhigaya si ay raaxo galmo uga helaan.

Waxaa loo arkaa in ayna habooneyn in waalidiintu sariir kula seexdaan carruurta waaweyn, ama u fiirsadaan marka carruurta waaweyn ay labisanayaan. Carruurta waaweyn ee iyagu isdaryeeli kara waa in loo oggolaado in musqusha tagaan keligood.

WAA MAXAY DAYACIDDA?

Dayaca waa ku guuldareysi daboolidda baahida aasaasiga ah ee ilmaha ee cuntada, huga, hoyga, daryeelka caafimaad, waxbarashashada, iyo ka ilaalinta dhibaato. Haddii ay dhibaato kaa haysato daboolidda baahida ee qoyskaaga, kaalmo la xiriirta dhaqaalaha, bankiyada Cuntada, hoyaasha degdeg ah iyo dhar deeq ah ayaad heli kartaa. Waalidiinta waxaa sharci ahaan ku waajib ah in carruurtu ay u helaan waxbarashada ay xaqa u leeyihiin. Carruurta waxaa looga baahan yahay sharci ahaan inay iskool dhigtaan ilaa iyo inta ay ka gaarayaan ugu yaraan 16 sano jir.

Ammaanka darteed, carruurta yar yar waa in aan marnaba laga tegin iyada oo aan lala joogin. sharciga ayey kasoo horjeedaa in ilmaha looga tago keligood meel dhibaato kasoo gaari karto ama khatar ah. Haddii waalidiinta meel u baxayaan ayna tahay inay ka tagaan ilmo da'doodu ka yartahay 10, waxaa looga baahan yahay inay helaan qof mas'uul ah ee ilmaha sii ilaaliya inta ay maqan yihiin. Waa halis in ilmo baabuurka keligiis looga tago, xataa haddi aad xirtid baabuurka iyo haddii aad ka maqnaaneysid dhowr daqiiqo .

SOO-SHEEGIDDA WAXYEELAYNTA ILMAHA?

Haddii uu qof soo sheego in ilmahaaga la waxyeeleynayo ama la dayaco, shaqaale ka socda badbaada ilmaha ayaa soo booqanaya si ay u hubiyaan inay jirto wacyeeleyn. Shaqaalaha badbaada ilmaha waa inay go'aan ka gaaraan in ay jirto in ilmaha la waxyeeleyey. Haddii qofkaa shaqaalaha ah uu u maleeyo ilmahu inuu khatar ku sugan yahay, qofka shaqaalaha ah waa inuu go'aan ka gaaraa sida loo badbaadin lahaa ilmaha loona caawin lahaa Qoyska. Shaqaalaha ayaa laga yaabaa inay Qoyska u fidiyaan adeegyo ama ay go'aansadaan in ilmaha si ku meel gaar ah guriga laga kexeeyo. Maadaama qaar ka mid ah Waxyeeleynta carruurtu ay yihiin dembi, booliska ayaa suurigal ah inay soo farageliyaan baarista arrintaas markaasna dembi kusoo oogaan qofkii looga shakiyey Waxyeeleynta.

Haddii waalidiintu ku qanci waayaan go'aanka qofka shaqaalaha babaadada ilmaha, waxay la hadli karaan qofka shaqaalaha ah maamulihiisa. Haddii qofka maamulaha ah uusan ku qancin arrintooda, waalidku waxay raadsan karaan qareen ka caawiyo la macaamilka hay'adda Badbaadada ilmaha. Waalidiinta aan awoodin inay qabsadaan qareen waxay ka heli karaan kaalmo lacag la'aan ah xafiiska gargaarka sharciga ah. Haddii ilmo lagala wareego daryeelka waalidka, waalidiintu had iyo jeer waxay xaq u leeyihiin inay maxkamada tagaan si u garsoore go'aan uga gaaro inayna ku habbooneyn daryeelka ilmahooda iyo in kale.

KAALMO MA LOO HELI KARAA WAALIDIINTA?

Waalidiinta intooda badani carruurtooda waa ay jecel yihiin laakiin mararka qaarkood dadka marka ay isku buuqansan yihiin waxa suurigal ah inay dadka ugu dhow ku caro baxaan.Haddii mid ka mid ah waalidka u ilmaha waxyeeleynayo, waxaa sharci ah waalidka kale inay waajib ku tahay inay badbaadiyaan ilmaha iyaga oo codsanayaa kaalmo ama ilmaha kala tagaya kan waxyeeleynaya.

dheeraad....

(....sii-socda)

Waalidnimada Gudaha Canada

Waxaa jira kaalmo loogu talagaalay waalidiinta iyo qoysaska. intooda badan xarumaha qoysaska iyo beesha ayaa bixiya tababbarro la xiriira waalidnimada sidii wax looga qaban lahaa xanaaqa iyo welwelka, iyo sida ilmaha loogu heli lahaa jawi nabadgelyo iyo jeceyl leh. Dugsiyo badan ee Canada waxa ay leeyihiin barnaamijyo si ay uga caawiyaan waalidka barashada habab cusub sidii wax looga qaban lahaa dhibaatooyinka iyo inay bartaan xirfado xallinta dhibaatooyinka. Barashada korriisimaha ilmaha waxay waalidka ka caawin kartaa in ay fahmaan ilmahooda iyo inay ogaadaan waxa laga fili kara ilmaha da' kasta ee kala duwan.

Soo baar inay leeyihiin waxbarasho waalidnimada xarumihiina bulshada ama dugsiyadu ay leeyihiin fasalo, la-taliyayaal, kooxaha taagyeerada, iyo meel muddo gaaban ilmaha lagu daryeelo haddii wax degdeg ah yimaadaan. Ma fududa inaad kaalmo weydiisato, laakiin waalid kasta mar mar dhibaato ayey la kulmaan. Xataa la hadalka waalidiinta kale ee dhibaatooyinka ku haysta kuwa la mid ah ay lasoo deristay ayaa welwelka kaa yareynaya.

Iskuday in aadan naf ahaantaada dareemin cidlo ama kelinnimo. Waxaa jira dadka bulshada ka tirsan oo halkaasi u jooga inay caawiyaan – kuwaas oo badidood leh waayo-aragnimo safka hore ah halganka la qabsashada dhaqanka cusub iyo dal cusub. Waxaa fiican inta ayna dhibaatooyinka sii xumaan in ka hor aad kaalmo heshid. Haddii aadan lahayna xarun bulsho, la hadal dhakhtarkaaga, Wasiirka, ama Waaxda Adeegyada qoyska.

Iyada oo aan loo eegeyn meeshaa aad kasoo jeedid iyo dhalshaba, waxaad xaq u leedahay adeegyada bulshada ka jira. Waalidiinta iyo carruurtu waa xubno muhim ah oo la qiimeeyo ee bulshada Canada, iyadoo aan loo eegeyn luuqadda ay ku hadlaan ama waddanka ay ka yimaadeen.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada loogu talagalay waalidiinta iyo carruurta ee bulshadaada, la xiriir hay'adda hoos ku qoran.

Xaashidan waxaa soo saaray Ururka Daryeelka Carruurta ee Canada, iyadoo kaalmada dhaqaale laga helay Barnaamijka Dhaqannada Kala Duwan ah Waaxda Hiddaha Canada. Waxaan jecelnahay in aan xusno Kaalmada ururka adeegyada dadka dalka ku cusub ee COSTI, Prof. Nicholas Bala ee Queens University, iyo Guddiga la Talinta ee u aasaasay Machadka ka Hortagga ah eeWaxyeeleynta Ilmaha.

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan wac The Children's Aid Society of Toronto ee **416 924-4646** ama **inquiries@TorontoCAS.ca**

www.TorontoCAS.ca